



Waxaad Caawin kartaa La dagaalanka COVID-19, Samboorka, iyo RSV!

Waxaan raadineynaa carruurta, iyo qoysaska inay ka qayb qaataan Daraasada CASCADIA! Waxay qaadataa keliya dhowr daqiiqo in lagu biiro.

SABABTEE AYAAN U SAMEYNEYNAA DARAASADAN?

Waxaan rabnaa inaan barano wax badan oo ku saabsan:

- Intee jeer COVID-19, samboorka, iyo RSV ay ku dhacaan carruurta iyo dadka weyn
- Sidee wanaagsan ayuu tallaalka COVID-19 uga illaaliyaa dadka caabuqa iyo jirada COVID

YAA KA QEYB QAADAN KARA DARAASADAN?

Waad u qalmi kartaa daraasadan haddii aad tahay:

- 6 bilood ilaa 49 sanno jirka
- Ku nool gudaha ama hareeraha Portland, Oregon

Uma baahnid in lagu tallaalo si aad uga qeyb qaadatid.

Qoyska oo dhan, ama kaliya carruurta ayaa ku biiri kara (xataa haddii qof weyn uusan ka qeyb qaadaneyn).

MAXAY TAHAY INAAN SAMEEYO HADDII AAN KA QEYB QAADANAYO?

Haddii aad ka qeyb qaadaneysid, waxaan ku waydiin doonaa inaad:

- U qaadatid baarida sanka guriga oo aad sidoo kale noo sheegtaa haddii aad dareemeysid jiro
- Booqataa rugteena hal jeer sannadkiiba oo aan kaa qaadno muuno yar oo dhiig ah.
- Ka jawaabtid sahan gaaban oo onleen ama teleefonka ah

Waxaan ka baareynaa muunadaada COVID-19, samboor, iyo RSV oo waxaan natijjooyinka ku siineynaa todobaad kasta!

Waxaad heleysaa kaararka hadiyada oo si laguugu mahadnaqo ka qeyb qaadashada daraasada.

Waxaad heleysaa natijjooyinka COVID-19, Samboorka & RSV!



Wixii warbixin dheeraadka ah iyo in lagu biiro daraasada, booqo websaydkeena: www.cascadiastudy.org ama sawiro koodhka QR.

Wixii su'aala ah? Imeelka noogu soo dir CHR_Cascadia@kpchr.org ama naga soo wac 503-335-6350.

Daraasada CASCADIA waxaa qabanaya Xarunta Cilmi baarida Caafimaadka ee Kaiser Permanente Northwest iyo University of Washington. Daraasada waxaa maalgeliya Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortagga Cudurka. Machadyadaan waxay u hogaansamaan dhamaman sharciyada xuquuqda rayidka ee Federaalka oo ma takooraan shaqsyaadka ama kooxaha dadka ah oo qaab jinsiyada, midabka, asalka dhalashada, da'da, naafanimada, ama jinsiga.